Casharka 45

1. Miyaa Ilaah dhowray ballankiisii uu la dhigtay Sekariyas iyo xaaskiisii Elisabeet ee ahaa inuu wiil siin doono?
-Haa.

2. Sidee baa Sekariyas ku ogaaday in Badbaadiyaha uu iman doono oo uu ka badbaadin doono awoodda dembiga, dhimashada, iyo Sahyddaanka?
-Waayo Sekariyas wuxuu akhriyey kitaabka Ilaah ee ah in Ilaah Rabbigu soo diri doono Badbaadiyaha.

3. Waa maxay shaqada wiilka Sakariyas ee Yooxanaa ah uu samayn doono?
-Yooxanaa wuxuu ka sii hor-marayaa Sayidka, oo wuxuu isaga u diyaargarayn doonaa jidka.

4. Waa kuma Sayidka Yooxanaa jidka uu u diyaar-garayn doono?
-Waa Ciise, oo ah Ilaaha Badbaadiyaha ah.

5. Sidee Buu badbaadiyaha imanayaa ula mid noqonayaa qorraxda oo soo baxaysa?
-Isla sida qorraxda subaxnimada ay iftiin u keento, habeenka gudcurka badan dabadeed, ayaa Sayidkuna u imanayaa inuu ift bixiyo marka laga soo gudbayo gudcurkii Shayddaanka.

6. Meeqo qorrax ayaa dunideennu leedahay?
-Waxay leedahay hal qorrax.

7. Meeqa badbaadiye ayaa Ilaah ballan qaaday inuu soo diri doono?
-Hal badbaadiye.



8. Sidee buu Sakariyas ku ogaaday in Badbaadiyuhu imanayo oo uu dadka ka babaadinayo awoodda dembiga, dhimashada, iyo Shayddaanka?
-Waayo Sekariyas wuxuu akhrin jiray kitaabka Ilaah, oo Ilaah wuxuu ballanqaaday inuu Badbaadiyaha soo diro.

-Sannado badan ka hor, Ilaah wuxuu Ibraahim, Isxaaq, iyo Yacquub ka ballan qaaday inuu Badbaadiyaha ka soo diri doono farcankooda.

-Haatanna, sannado badan dabadeed, Ilaah weli wuxuu dhowray ballankii uu la dhigtay ee ahaa inuu Badbaadiyaha ka soo diri doono faracii Ibraahim, Isxaaq, iyo Yacquub.

Bal aynu akhrinno Matayos 1:1-2

1-Kanu waa kitaabkii Abtirsiinyada Ciise Masiix, ina Daa'uud, ina Ibraahim.
2-Ibraahim wuxuu dhalay Isxaaq, Isxaaqna wuxuu dhalay Yacquub, Yacquubna wuxuud halay yahuudah iyo walaalihiis.

-Yuu ka soo farcamay Masiixu?

-Wuxuu ka soo farcamay Ibraahim, Isxaaq, iyo Yacquub.

-Ilaah ballammadiisa marnaba ma jebinayo.

-Ilaah mar waliba wuxuu dhowraa ballamadiisa.

-Bqorkee buu ka soo jeedaa ama Ciise Masiix ka soo farcamay?

-Wuxuu ka soo farcamay Masiixu boqor Daa'uud.

-Isla sida Ilaah horey u ballanqaaday isagoo nebiyadiisa hadalka soo marsiinaya, ayaa Ciise Masiix wuxuu ka soo farcamay Boqor Daa'uud.

-Ilaah ballammadiisa kama gaabiyo.

-Ilaah mar waliba wuxuu dhowraa ballammadiisa.

-Magac kale oo Ciise lahaa ama loogu yeeri jirey baa wuxuu ahaa Masiix.

-Muxuu magaca Masiix ka micne ahaa?

-Magaca Masiix wuxuu ka macne yahay nebi.

-Masiixa waxaa soo diray Ilaah si uu u noqdo nebi weyn.

-Ciise waxaa kaloo soo diray Ilaah si uu u noqdo nebi weyn oo dadka u sheega farriinta ugu weyn dunida.

-Magaca Masiix wuxuu ka macne yahay wadaad.

-Ciise waxaa soo diray Ilaah si uu u noqdo nebiga ugu weyn.

-Ciise waxaa soo diray Ilaah si uu u noqdo wadaad weyn oo bixiya allabbariga ugu weyn allabaryada.

-Magaca Masiix wuxuu kaloo ka macne yahay boqor.

-Masiixa waxaa soo diray Ilaah si uu isaga oo boqor oo ka soo farcamay Daa'uud uu wax u xukumo.



-Ciise waxaa soo diray Ilaah si uu u noqdo boqqorka ugu weyn boqorrada, oo haysan doona xukun weligiis ah.

-Ciise Masiix oo keliya ayaa Ilaah u ballan-qaaday inuu noqdo Badbaadiyaha.

-Masiixa oo keliya ayaa Ilaah u ballan qaaday inuu dadka ka badbaadiyo awoodda dembiga, dhimashada iyo Shaydd-aanka.

-Ilaah wuxuu u soo diray Malag si uu Maryama ugu sheego inay dhali doonto BAdbaadiyaha.

-Ha yeeshee Maryama waxay u doonnanayd inay guursato nin la yiraahdo Yuusuf.

-Ha yeeshee dhibaato ayaa timid.

-Maryama waxay ahayd bigrad oo waxay doonnanayd nin la oran jiray Yuusuf, oo ay ku ballameen inay is-guursadaan, laakiin ilmo ayey qaadday ama uuraysatay.

-Maaddaama Yusuf aanu weli mehersanin Maryama, ayaanu innaba u tegin naagtiisa.

-Maaddaama Maryama ay lahayd uur, maxaa Yuusuf ay la haayd?

-Yuusuf waxay la ahayd in Maryama ay nin kale la seexatay.

-Marka ay sidaas tahayna, Yuusuf waxay la noqotay inuu iska furo Maryama.

Bal aynu akhrinno Matayos 1:18-19

18-Dhalashadii Ciise Masiix sidanay ahayd. Kolkii hooyadiis Maryan u doonanayd Yuusuf, intaanay isu iman, waxaa la arkay iyadoo Ruuxa Qodduuskaa ka uuraysatay.
19-Ninkeedii Yuusuf wuxuu ahaa nin xaq ah oo aan doonayn inuu dadka tuso, wuxuuse doonayay inuu si qarsoon u eryo.

-Miyaa haddaba Maryama la seexatay nin kale?

-Maya.

-Haddaba sidee baa maryama carruur u qaadi kartaa ama ilmo caloosheeda ku geli karaan?

-Ilaaha Ruuxa Qodduuska ah ayaa wuxuu samaynayaa mucjiso, oo Maryama sidaas bay ilmo ku qaadday.

-Ilmaha ay Maryama caloosha ku waddo wuxuu ahaa Badbaadiyaha Rabbiga ah.

-Ilaah ma uusan doonayn in Yuusuf furo Maryama.

-Marka ay sidaas tahay, Ilaah wuxuu u soo diray Yuusuf malag inuu riyada kula hadlo.

Bal aynu akhrinno Matayos 1:20-21

20-Laakiin intuu waxan ka fiirsanayay ayaa malaa'gitii Rabbigu riyo ugu muuqatay, iyadoo leh, Yuusuf ina Daa'uudow, ha ka baqin inaad naagtaada Maryan qaadatid, waayo, waxa ay uuraysatay ayaa Ruuxa Qodduuskaa ka yimid.
21-Oo waxay umuli doontaa wiil, magiciisana waxaad u



bixin doontaa Ciise, waayo, dadkiisa ayuu dembiyadooda ka badbaadin doonaa.

-Muxuu malaggu ku yiri Yuusuf intii uu riyada ku jiray?

-Mlaaa'igtu waxay tiri Maryama waxay haysatay wiil waayo Ilaaha Ruuxa Qodduuska ah ayaa mucjiso sameeyey si taasi ku hirgasho.

-Malagga wuxuu yiri wiilka Maryama wuxuu noqon doonaa Badbaadiyaha oo noqonaya Wiilka Ilaah.

-Malagga wuxuu leeyahay Yuusuf waa inuu Maryama kaxaysto oo ay xaaskiisa noqoto.

-Malagga waxaa kaloo uu Yuusuf ku yiri waa inaad ilmaha Maryama ay dhali doonto ugu yeerto Ciise.

-Ciise wuxuu ku dhalanayaa dunidan si uu u badbaadiyo dadka.

-Ciise wuxuu u yimid inuu dadka ka badbaadiyo awoodda dembiga.

-Ciise wuxuu kaloo u yimid inuu dadka ka badbaadiyo awoodda dhimashada.

-Ciise wuxuu kaloo u yimid inuu dadka ka badbaadiyo awoodda Shayddaanka.

Bal aynu akhrinno Matayos 1:22-23

22-Waxaas oo dhan waxay u dheceen in la arko wixii Rabbigu kaga dhex hadlay nebiga, isagoo leh,

23-Gabadh bikrad ah baa uuraysan doonta oo wiil umuli doonta, Magiciisana waxaa loo bixin doonaa, Emmanuu'eel, kan macnihiisu yahay, Ilaah baa inala jooga.

-Waxaa nebiyadu ay yiraahdeen Bdbaadiyaha waxaa ku curan doona gabar bigrad ah.

-Isla sidii uu Ilaah ballan-qaaday ee uu nebiyada inoo soo marsiiyey wakhti hore, ayaa Ciise Masiix ka dhashay gabar bigrad ah.

-Maaddaama Ciise isagu ahaa Sayid ama wiilka Ilaah, waxay ahayd inuu lahaado magacyo badan.

-Magac kale oo loogu yeeri jiray ayaa wuxuu ahaa Cimaa-nueel.

-Muxuu haddaba magaca Cimaanu'eel ka macne yahay?

-Magaca Cimaanu'eel wuxuu ka macne yahay Ilaah baa inala jira.

-Maxaa haddaba Ciise loogu yeeray Cimaanuu'eel?

-Waayo Ciise wuxuu ahaa Badbaadiyaha Rabbiga ah ee dadka la noolaanaya.

-Wiilka Maryama ay dhali doonto waxaa loogu yeeri doonaa Ciise, oo ah Rabbiga Badbaadiy aha ah, oo ka yimid Samada si uu ula noolaado dadka.

-Maxaa Yuusuf sameeyey markii uu ka kacay hurdadiisii?

Bal aynu akhrinno Matayos 1:24-25



24-Markaasaa Yuusuf hurdadii ka kacay oo yeelay sidii malaa'igtii Rabbigu ku amartay, oo naagtiisii ayuu qaatay;
25-uma uuse tegin iyada ilaa ay wiil umushay, oo wuxuu magiciisa u baxshay Ciise.

-Yuusuf wuxuu addeecay wixii Ilaah isaga u sheegay iyadoo loo soo marayo Malagga.

-Yuusuf wuxuu xaas ahaan u keensaday maryama gurigiisii.

-Balse Yuusuf uma uusan tegin iyadii ilaa ay wiil umushay.

-Casharka xiga, waxaannu ku baran doonnaa qiso ku saabsan dhalashadii Ciise Masiix.